

Ikhtiyaarada si aad ugu codeyso goor hore

Waxaad goor hore ku codeyn kartaa warqada doorashada maqanaanshaha ka hor Agoosto 2-deeda doorashada koowaad oo waxaad haysataa ikhtiyaaro badan ood sameyn karto:

- Sida ka hor 40-tan maalmood maalinta doorashada, kaas oo ahaa Juun 23^{deeda}, waxaad goor hore ka codeyn kartaa xafiiska karraaniga. Keliye iska gudbi codsi warqada doorashada maqanaanshaha shakhsii ahaan oona codey inta meshaas aad joogto.
- Ikhtiyaarka xigga waxaad ka codeyn kartaa gurigaaga adigoo ka codsanaya warqada doorashada maqanaanshaha doorashada koowaad.
 - Codsiga warqada doorashada ee maqanaanshaha waxa laga heli karaa shabakada interneetka oo ah **Michigan.gov/Vote**, waxaa lagu dhameystiri kara daqiqado kooban, waxaana loogu gudbin karaa karaanigaaga si elektorooniqa ah.
 - Sidoo kale waad daabici kartaa, waadna buuxin kartaa oona saxiixi kartaa, oona boosto ahaan ama iimeyl ahaan ugu diri kartaa karaanigaaga.
 - Warqadaada doorashada adiga ayaa laguu soo dirayaa, oo waadna ku codeyn kartaa oona kusoo celin kartaa boosto ahaan, ama adigoo keenaya xafiiska karaanigaaga ama kuridi kartaa sanduuqa lagu rido warqadaha doorashada. Waxaad ka heli kartaa xafiiska karaanigaaga iyo booska sanduuqa lagu rido warqadaha doorashada halkan **Michigan.gov/Vote**.
 - Haddii aad go'aansato in aad boosto ahaan ugu dirto, waxaan kugula talinaynaa in aad boostada u gudbiso ugu dambayn **Luulyo 18-deeda**, lacala haddii ay jiraan dib u dhac boosto.

Labadan ikhtiyaar waxey kuu ogalaanayaan in aad si fiican u codeyso ka hor Agoosto 2-deeda oo waxaa lagugu dhiiri gelinayaan in aad sidaas sameyso si warqadaada doorashada loo helo ayadoo waqtii dhimanyahay.